HESHIISKA KIRADA / Jadwalka Tusmada

Qaybta	Mawduuca	Bogga #
1.	Dhinacyada iyo Hoyga	1
2.	Dhererka Wakhtiga (Muddada)	1
3.	Kirada	1
4.	Isbeddelka Qaybta Ijaarka ee Kiraystaha	2
5.	Dalacaada Lacagaha soo daahay iyo Jeegaga La soo Celiyey	2
6.	Xaalada Hoyga	2
7.	Dalacaada Korontada iyo Adeegyada	2,3
8.	Carbuunta	3,4
9.	Furayaasha iyo Qufulada	4
10.	Dayactirka	4,5
11.	Waxyeellada	5
12.	Xannibaadyada wax-ka-beddelka	5,6
13.	Xayiraaddaha Guud	6
14.	Xeerarka iyo Qawaaniinta	6-9
15.	Dib-u-xaqiijinta sida Joogtada ah loo Qorsheeyey	9
16.	Ka Warbixinta Isbeddelada u Dhaxeya Dib-u-xaqiijinta si Joogta ah loo Qorsheeyey	9,10
17.	Jarrida Kaalmada-dhaqaale	10
18	Waajibaadka Kiraystaha ee Dib-u-bixinta Lacagta	11
19.	Cabbirka Hoyga	11
20.	Gelitaanka Mulkiilaha	11
21.	Mamnuuca Takooridda	11
22.	Isbeddelka Heshiiska Kirada	11
23.	Joojinta Kiraysashada	11,12,13
24.	Khataraha	13
25.	Ciqaabaha soo Gudbinta Macluumaad Been ah	13
26.	Ka Maqnaanshaha Kiraystaha Hoyga	13
27.	Ka Taggida Hantida Gaarka ah	13
28.	Ogeysiisyada iyo Codsiyada Dayactirka	14
29.	Luminta Curaarta iyo Hantida Gaarka ah	14,15
30.	Ka-dhaafid Mulkiiliyad	15
31.	Dulucda Heshiiskan	15
32.	Lifaaqyada Heshiiska	15
33.	Xuquuqda Abaabulka ee Kiraystaha	15
34.	Xaqiijinta Dakhliga Kiraystaha	15
35.	Joojinta Qaybta 8aad ee Heshiiska Taageerada Guryeynta	15
36.	Saxiixyada	15

HESHIISKA KIRADA

1. **Dhinacyada iyo Hoyga**: Dhinacyada Heshiiskan dhexmarayo waxaa _____, loo yaqaan Mulkiilaha, iyo _____ iyo _____, halkan ka dambe loo yaqaan si wadajir ah Kireyste. Mulkiilaha wuxuu ka ijaaray Kiraystaha hoyga lambarkiisu yahay _____, ku yaala _____, ee dhismaha loo yaqaano _____. Haddii hoyga laga ijaaro in ka badan hal kireyste, dhammaan waajibaadyada hoos ku xusan waa mas'uuliyada wadajirka iyo dhowrka ah ee Kireyste kasta oo saxiixa Heshiiskan Kirada. Wakiilka Maamulka ee Mulkiilaha waa Franklin Asset Management Company (Shirkadda Maareynta Hantida ee Franklin), 2509 Plantside Drive, P.O. Box 99564, Louisville, Kentucky 40299.

2. **Dhererka Wakhtiga (Muddada):** Muddada ugu horeeysa ee Heshiiskan waa inuu bilaabmaa _____ iyo inuu dhamaadaa _____. Ka dib marka ay dhammaato muddada bilowga ah, Heshiiska wuxuu sii socon doonaa muddooyin isdabajoog ah oo hal sanno midkasta haddii aan la joojin sida ku qeexan farqadaha 23 iyo 35 ee Heshiiskan. Marka la joojiyo, xuquuqda lahaanshaha hoyga waa inay u noqotaa Mulkiilaha.

3. **Kirada:** Kiraystaha wuxuu oggolaaday inuu bixiyo $_____ ee qaybta ka harsan bisha dhammaanayso _____. Markaa ka dib, Kiraystaha wuxuu oggolaaday inuu bixiyo kiro dhan $_____ bil kasta. Lacagtani waxaa la filayaa maalinta 1aad ee bisha _____ _____. Kiraystaha waa inuu bixiyaa kirada halkan ku xusan marka la filayo iyada oo aan waxba laga jarin, oo wax waajibaad ah ka saarnayn dhinaca Mulkiilaha si uusan u iman wax dalab ah oo isku mid ah. Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay in kirada bishaan ay ka yartahay kirada (kabid la'aan) suuqa ee laga filayo hoygan. Kiradan hooseysa waa la heli karaa maaddaama rahanta dhismahani ay kabtay Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD) iyo/ama maaddaama HUD bil kasta siiso Mulkiilaha lacagaha iyaga oo ka wakiil ah Kiraystaha. Lacagtan, haddii ay jirto, in HUD laga helo bil walba iyaga oo ka wakiil ah Kiraystaha waxaa lagu magacaabaa kaalmada lacagta ee Kiraystaha waxaana lagu muujiyay "Lacagta Kaalmada" ee Xaqiijinta U-hoggaansamida Mulkiilaha ee Foomka U-qalmashada Kiraystaha iyo Hannaanka Kirada Kiraystaha ee HUD kaas oo ku lifaaqan Lam. 1aad ee Heshiiskan.

a. Kirada waxaa kaliya oo lagu bixin karaa jeeg ama jeega wareega ee la bixin karo:

_____

Mulkiilaha wuxuu xaq u leeyahay, isaga oo doorbidaayo, inuu diido jeegaga qof saddexaad. Kirada lagu bixiyo jeeg ama jeega wareega looma aqoonsan doono inuu helay ama aqbalay Mulkiilaha ilaa uu bixiyo bangiga jeega loo geeyay. Haddii ay dhacdo in la aqbali waayo jeeg ama jeega wareega uu Kiraystaha u bixiyay lacagta kirada ahaan, Mulkiilaha waa inuu qabatimaa oo xaq u lahaadaa inuu fuliyo dhammaan xuquuqdiisa hoos timaada Heshiiskan Kirada, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, joojinta kireysiga bixin la'aanta lacagta kirada awgeed, iyo ficilada hore ee mulkiilaha ee helitaanka damaanada iyo isku dayga in laga wada xaajoodo si la mid ah looma aqoonsanayo in laga dhaafo mid ka mid ah xuquuqda Mulkiilaha. Kiraystaha looma tixgelin doono inuu lacagta bixiyay, ama Mulkiilaha uma arki doono inuu helay, wax ijaarka Kiraystaha ah oo la sheegay in lacag caddaan ahaan loo siiyay mid ka mid ah shaqaalaha ama wakiilka mulkiilaha, taas oo lacagta la bixiyay aan si madaxbannaan loo xaqiijin karin.

b. Kirada wuu aqbali doonaa Mulkiilaha iyadoon loo eegin dalacaada kale ee uu ku leeyahay Kiraystaha. Mulkiilaha wuxuu xaq u leeyahay inuu ula xisaabtamo Kiraystaha si gooni ah bixinta dalacaada kale, taas oo Mulkiilaha uu ku raadsan karo lacag-bixinta turxaan-bixin sharci oo gooni ah. Haddii ay noqoto mid lagama maarmaan ah in Mulkiilaha gudbiyo talaabo madani ah loogu talagalay ururinta kirada iyo/ama dalacaada kale, ayna Maxkamaddu u xugmiso Mulkiilaha, markaa, ilaa iyo inta uu sharcigu oggolyahay, Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu bixiyo ujrada qareenka macquulka ah ee Mulkiilaha iyo dalacaada la xiriira tallaabada madaniga ah.

4. **Isbeddelka Qaybta Kirada ee Kiraystaha:** Kiraystaha wuxuu oggolyahay in lacagta kirada uu bixiyo Kiraystaha iyo / ama lacagta taageerada HUD ay bixiso iyaga oo ka wakiil ah Kiraystaha in la beddeli karo inta lagu jiro muddada Heshiiskan haddii:

a. HUD ama Maamulaha Heshiiska (sida Hay'adda Guriyeynta Dadwaynaha) ay go'aamiyaan, iyada oo la raacayo hannaanka HUD, in loo baahan yahay in kirada la kordhiyo;

b. isbeddel ku yimaadda HUD ama Maamulaha Heshiiska gunnada korontada ama adeegyada loo tixgeliyo xisaabinta qaybta ijaarka ee Kiraystaha;;

c. dakhliga, tirada qoyska Kiraystaha ama waxyaabaha kale oo loo tixgeliyay in lagu xisaabiyo isbeddelka ijaarka Kiraystaha iyo hannaanka HUD ay muujiyaan in ijaarka Kiraystaha kirada ama lacagta kaalmada in loo hagaajiyo si loo muujiyo isbeddelka;

d. isbeddelka ijaarka Kiraystaha ama lacagta kaalmada waxaa looga baahan yahay dib-u-xaqiijinta HUD ama hannaanka joojinta kabidda;

e. isbeddel ku yimaadda hannaanka HUD ee lagu xisaabinayo lacagta kaalmada Kiraystaha ama kirada; ama

f. Kiraystaha uu ku fashilmo inuu bixiyo macluumaad ku saabsan dakhligiisa/dakhligeeda, qoyskiisa/qoyskeeda ama waxyaabaha kale sida uu rabo Mulkiilaha.

Mulkiilaha wuxuu oggolaan inuu fuliyo isbeddelka ku yimaadda ijaarka Kiraystaha ama lacagta kaalmada kaliya iyada oo la raacayo wakhti go'an iyo habraaca maamulka socda ee buug-gacmeedka HUD, tilmaamaha iyo qawaaniinta la xiriira maareynta maamulka barnaamijyada kabidda dhqaale ee qoysaska dhawrka ah. Mulkiilaha wuxuu oggolaan inuu siiyo Kiraystaha ugu yaraan 30 maalmood oo ogeysiis qoran ah oo ku saabsan mid kasta oo kordhinta ijaarka Kiraystaha marka laga reebo sida ku xusan faqradaha 11, 15 ama 17. Ogaysiisku wuxuu sheegi doonaa lacagta cusub oo looga baahan yahay Kiraystaha inuu bixiyo, taariikhda lacagta cusub la bixinayo, iyo sababaha isbeddelka kirada. Ogaysiisku wuxuu sidoo kale kula talin doonaa Kiraystaha in uu/ay la kulmi karaan Mulkiilaha si looga wada hadlo isbeddelka kirada.

5. **Dalacaada Lacagaha soo daahay iyo Jeegaga La soo Celiyey:** Haddii Kiraystaha uusan bixin lacagta dhan ee kirada ee ku qeexan farqada 3aad dhamaadka bisha 5aad, Mulkiilaha waxaa laga yaabaa inuu qaado khidmad $5.00 maalinta 6-aad ee bisha. Intaas ka dib, Mulkiilaha laga yaabaa inuu ururiyo $1 maalin dheeraad ah oo kasta oo kirada aan la bixinin inta lagu jiro bisha la filayo. Mulkiilaha gurigu uma joojin karo Heshiiskan ku guuldareysiga bixinta dalacaada daaha, laakiin wuxuu u joojin karaa Heshiiskan bixin la'aanta kirada, sida lagu sharraxay farqada 23. Mulkiilaha waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu ururiyo dalacaad dhan $10.00 maalinta labaad ama waqti kasta oo dheeraad ah aan jeega lacag bixinta la aqbalin (soo-noqon). Dalacaada lagaga hadlay farqadani waxay dheeraad ku yihiin kirada bisha ee caadiga ah ee laga doonayo Kiraystaha.

6. **Xaalada Hoyga:** Marka uu saxiixo Heshiiskan, Kiraystaha wuxuu qirayaa in hoygu yahay mid ammaan ah, nadiif ah iyo xaalad wanaagsan. Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa in qalabka korontada iyo qalabyada ku jira hoyga ay si wanaagsan u shaqeynayaan, marka laga reebo kuwa lagu sharraxay Warbixinta Kormeerka Hoyga, oo ah Lifaaqa Lam. 2 ee Heshiiskan. Kiraystaha sidoo kale wuxuu oggolyahay in Mulkiilaha uusan wax ballan ah kala gelin inuu qurxiyo, beddelo, dayactiro ama hagaajiyo hoyga, marka laga reebo sida ku qoran Warbixinta Kormeerka Hoyga.

7. **Dalacaada Korontada iyo Adeegyada:** Jaantusyada soo socda ayaa sharaxaya sida kharashyada korontada iyo adeeggyada ee la xiriira degenaanshaha hoyga loo bixin doono. Kiraystaha wuxuu oggolyahay in jaantusyadani si sax ah u qeexayaan kharashaadka korontada iyo adeegyada uu bixiyo Mulkiilaha iyo kuwa uu bixiyay Kiraystaha.

a. Kiraystaha waa inuu ku bixiyaa kharashka korontada ee ku qoran udubta (1) hoose. Lacag-bixinta waa in si toos ah loo siiyaa shirkada korontada ee ku habboon. Waxyaabaha ku qoran udubta (2) hoose waxaa lagu daraa ijaarka Kiraystaha.

b. Kiraystaha waa inuu ku qoraa dhammaan adeegyada korontada ee socda udubta (1) hoose ee magaca Kiraystaha ee bilawga ijaarka, waa inuu u keenaa mulkiilaha isla markaa caddaynta waana inuu hayaa isla markaa lacag bixintiisa/bixinteeda. Kiraystaha waa inuu keenin ama oggolaan wax carqalad ah adeegyadiisa/ adeegyadeeda korontada

inay ku dhacaan ama inuusan u sababin in adeegyadiisa/ adeegyadeeda korontada go'aan iyadoo sabab u tahay lacag bixin la'aan ama wixii ficilo ama guuldareysi kale ah ee ka yimaadda Kiraystaha.

(1) Ku qor "x" adeegga korontada Kiraystaha Wuxuu Toos u Bixiyaa	Nooca Adeegga Korontada	(2) Ku qor "x" adeegga korontada Lagu Daray Ijaarka Kiraystaha
_____	Kululaynta	_____
_____	Nalalka, Aaladdaha	_____
_____	Cunto Karinta	_____
_____	Biyaha	_____
_____	Qashin Qubbid	_____
_____	Kale (Sheeg)	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____

8. **Carbuunta:** Kiraystaha wuxuu bixiyay carbuun $_____ Mulkiilaha dabaaji curaar ahaan. Carbuunta waxaa hayn doona Mulkiilaha damaanad ahaan si mulkiilaha isaga ilaaliyo wixii khasaaro ama waxyeello uga iman kara Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, iyo/ama martida Kiraystaha. Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay in mas'uuliyadiisa khasaaraha iyo/ama waxyeelada aysan ku koobnayn lacagta carbuunta ah, iyo in wax kasta oo khasaaro iyo/ama waxyeello ah oo ka badan carbuunta ay tahay waajibaadka Kiraystaha. Marka laga reebo inay ku kooban tahay xeerka ama qawaaniinta lagu dabaqi karo, "khasaaro" sida halkan lagu isticmaalay, waxaa ka mid ah, laakiin uusan ku xaddidnayn, dhammaan akhlaaqxumada kirada, dalacaada daahda, kharashyada dib-loo-galo, khasaaraha isticmaalka, kharashka qareenka ee macquulka ah iyo kharashaadka maxkamadda e dacwadaha lagu guuleystay uu galay Mulkiilaha si uu dib ugu helo mulkiiliyada guriga, khasaarinta ama si xun u isticmaalka korontada iyo/ama adeegga, qaadista iyo kaydinta hantida gaarka ah ee Kiraystaha, oo ay ku jiraan baabuurta, cuuryaaminta aan habooneyn ee hawlaha ganacsiga ee mulkiilaha, kharashyada kla xiriira qaadista iyo kaydinta qalabka guryaha ee qofka soo degi raba iyo siinta qolol beddel ah ee isku mid ah haddii ay dhacdo Kiraystaha inuu ku nagaado, iyo kharashaad kasta oo kale, ama dalaacd ama ganaax lacageed dowladeed uu galay Mulkiilaha taasoo ka dhalatay xadgudub kasta oo ku yimid Kireysigan, isticmaalka aan habooneyn ee hoyga ama danbi-qarinta, ama dayacaada ka dhalatay Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha iyo/ama qof kasta oo kale oo hoos yimaada xakamaynta Kiraystaha. "Khasaaraha," sida halkan lagu isticmaalay, waxaa ka mid ah, laakiin aysan ku xaddidnayn, burburinta, waxyeelaynta, ka saarista, naafaynta iyo qiimadhaca hantida, duugoobidda la filayo iyo sidoo kale wax kasta oo dib-u-habeynta, isbeddelka ama wax-ka-beddelida uu sameeyay Kiraystaha iyadoo aysan jirin oggolaansho hore oo qoraal ah ee Mulkiilaha. Mulkiilaha wuxuu hayn doonaa carbuuntan muddada Kiraystaha hoyga deggan yahay. Ka dib markii Kiraystaha ka guuro hoyga, Mulkiilaha wuxuu go'aan ka gaari doonaa in Kiraystaha u qalmo lacag-celis qayb ka mid ah ama dhammaan carbuunta. Caddada lacag-celinta waxaa la go'aamin doonaa iyadoo la raacayo shuruudaha iyo habraacyada soo socda.

a. Kiraystaha wuxuu u qalmi doonaa lacag-celinta carbuunta kaliya haddii Kiraystaha uu siiyay Mulkiilaha 30 cisho oo qoraal ogeysiis ah oo ujeedkiisu yahay ka guuritaan sida looga baahan yahay qodobbada 23aad, haddii uusan Kiraystaha awoodin inuu bixiyo ogeysiis sababtiisu yahay mid ka baxsan xakamayntiisa/xakamaynteeda.

b. Ka dib marka Kiraystaha ka guuro hoyga, Mulkiilaha wuxuu kormeeri doonaa hoyga wuxuuna buuxin doonaa Warbixinta Kormeerka Hoyga kale. Mulkiilaha wuxuu u oggolaan doonaa Kiraystaha inuu ka qaybqaato kormeerka, haddii Kiraystaha sidaas codsado.

c. Mulkiilaha wuxuu dib ugu celin doonaa Kiraystaha carbuunta oo lagu daray dulsaar lagu xisaabiyay _____%, laga bilaabo _____, laga jaray caddad kasta oo loo baahan yahay si loo bixiyo kharashka:

(1) kirada aan la bixinin iyo wixii "khasaaro" kale ah ee soo gaaray Mulkiilaha ilaa iyo inta uu oggol yahay sharciga lagu dabaqi karo;

(2) khasaaraha aan sabab u ahayn duugoobidda oo aan ku qorneyn Warbixinta Kormeerka Hoyga ee hore;

(3) dalacaada kirada daahda iyo jeegaga la soo celiyay, sida ku qeexan farqada 5aad; iyo

(4) dalacaada furayaasha aan la soo celin, beddelka furayaasha, beddelka qufulada, ka caawinta gelitaanka marka ay dhacdo inuu Kiraystaha geli waayo, iyo furayaasha dheeraadka aan la soo celin, dhammaan sida lagu qeexay farqada 9aad.

d. Mulkiilaha oggolaaday inuu soo celiyo ee lagu xisaabiyay faqrada 8c soddon (30) maalmood gudahood ka dib markii Kiraystaha si joogto ah uga guuro hoyga, celiyo mulkiiliyada, oo u siiyo cinwaankiisa/cinwaankeeda cusub Mulkiilaha. Mulkiilaha wuxuu sidoo kale siin doonaa Kiraystaha liis qoran oo dalacaada ah oo laga jaray carbuunta. Haddii Kiraystaha diido caddada uu jaray Mulkiilaha oo uu weydiisto inuu la kulmo Mulkiilaha, Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inuu la kulmo Kiraystaha oo uu si aan rasmi ahayn ugala hadlo dalacaada lagu muransan yahay.

e. Haddii hoyga ay kiraysteen in ka badan hal qof, kiraystayaashu waxay oggolaanayaan in ay ka shaqeyn doonaan macluumaadka kala qaybsiga wixii lacag-celin ah iyaga dhexdooda. Mulkiilaha wuxuu bixin doonaa lacag-celinta Kirayste kasta ee lagu qeexay farqada 1aad ee Heshiiskan.

f. Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay in Mulkiilaha uusan ku xisaabin doonin carbuunta kirada ugu dambeysa ee bisha ama dalacaada dayactirka lagu leeyahay Kiraystaha si waafaqsan qodobka 11aad.

9. **Furayaasha iyo Qufulada:** Kiraystaha wuxuu oggolaanyaa inaanu ku rakibin qufulo ama albaabo dheeri ah ama ka duwan albaab daaqad kasta ee hoyga ku yaala iyada oo uusan ka haysan oggolaansho qoraal ah Mulkiilaha. Haddii Mulkiilaha ansixiyo codsiga Kiraystaha ee ah inuu ku rakibo qufulada, Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu siiyo Mulkiilaha furaha mid kasta. Marka Heshiiskani uu dhammaado, Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu dhammaan furayaasha hoyga ku soo wareejiyo Mulkiilaha. Mulkiilaha wuxuu ka qaadi karaa Kiraystaha $5.00 fure kasta oo aan la soo celin waqtigii guuritaanka iyo marka loo geeyo kharashka beddelka buuxa ee furaha. Beddelidda furayaasha lumo inta lagu jiro muddada ijaarka Kiraystaha waxay ku qasbi doontaa Kiraystaha dalacaad maamul oo $5.00 ah. Haddii beddellida qufullada Kiraystaha ay noqoto mid daruuri ah muddada ijaarka Kiraystaha iyadoo sabab u tahay dayacaad ama falal ula kac ah uu Kiraystaha, qoyska Kiraystaha iyo/ama martida Kiraystaha ay gaystaan. Kiraystaha wuxuu ku qasbanaanayaa inuu bixiyo kharashka beddelida qufullada oo buuxa dalacaad maamul ahaan. Haddii Kiraystaha u baahdo caawinta Kiraystaha ee gelitaanka guriga marka ay dhacdo in Kiraystaha bannaanka ku xannibmo, Kiraystaha wuxuu bixinayaa dalacaad maamul oo ah $5.00 inta lagu jiro saacadaha xafiiska Mulkiilaha ka shaqaynayo, ama $25.00 ka dib saacadaha xafiiska Mulkiilaha ka shaqaynayo. Haddii maamulaha goobta uu siiyo furo dheeri ah Kiraystaha, laakiin furaha dheeriga ah aan si degdeg ah la soo celinin, Kiraystaha waa inuu dib u siiyaa Mulkiilaha kharashka beddelida ee buuxa ee furahaas dalacaad maamul ahaan. Dhammaan dalacaada maamul waa in lagu bixiyaa 30 maalmood gudahood ka dib marka Mulkiilaha uu bixiyo ogeysiis qoran oo la mid ah.

10. **Dayactirka:**

a. Mulkiilaha wuxuu oggolaanayaa inuu:

(1) si joogto ah u nadiifiyo dhammaan goobaha guud ee dhismaha;
(2) joogteeyo xaalada ammaan ee goobaha iyo xarumaha guud;
(3) u diyaariyo uruurin iyo qaadis jajabka iyo qashinka,
(4) joogteeyo ammaanka iyo shaqaynta qalabka iyo aaladaha;
(5) sameeyo dayactirka lagama maarmaanka ah si dhaqso ah oo macquul ah;
(6) joogteeyo shaqaynta nalalka ku xiran bannaanka;
(7) bixiyaan adeegyo burburinta, sida ugu muhimsan; iyo
(8) ilaaliyaan dhulka iyo geedaha.

b. Kiraystaha wuxuu oggalaanayaa inuu:

(1) ka dhigo hoyga mid nadiif ah, qallalan oo xaalad nadaafadeed leh wuxuuna u hoggaansamayaa dhammaan sharciyada caafimaadka iyo amniga, qawaaniinta iyo tilmaamaha;

(2) u isticmaalo dhammaan aaladaha, aaladaha rakiban iyo qalabka si ammaan leh oo kaliya ah ujeeddooyinka loogu talagalay;

(3) ku daadin qashin dhulka ama goobaha guud ee dhismaha;

(4) burburinin, bi'in, waxyeelleyn ama qaadin wax ka mid ah hoyga, goobaha guud, ama dhulka dhismaha;

(5) siiyo Mulkiilaha ogeysiis degdeg ah oo ku saabsan wax kasta oo cillad ah, hawl-gab ah iyo/ama xaaladaha aan ammaanka ahayn ee tuubbaynta, qalabka rakiban, aaladaha, qalabka kululaynta iyo qaboojinta ama qeyb kasta oo ka mid ah hoyga ama xarumaha la xiriira;

(6) ka qaadayo qashinka iyo qubka kale hoyga si dhakhso ah oo nadiif ah;

(7) siiyo Mulkiilaha ogeysiis degdega ah ee xaalad kasta, daruufaha iyo/ama daruufaha ku xeeran ama ku saabsan duddada uu Kiraystaha u arko inay yihiin halis ammaan iyo/ama khatar sabab kasta ha ahaatee iyo/ama in Kiraystaha aaminsan yahay inay ka koobnaan karto sabab kasta ha ahaatee halis caafimaad iyo/ama amni oo kireyste, deggane, marti, shati-hayste, codsade, ama qof kasta oo kale oo jooga ama ku jira duddada.

(8) beddelin ama ka saarin qayb ka mid ah aaladaha, alaabta rakiban ama qalabka ee ku yaala hoyga oo aan khasaarin korontada uu bixiyay Mulkiilaha;

(9) isticmaalin hab kasta oo kululeyn ama qaboojin ee aan ka ahayn kuwa uu bixiyay mulkiilaha, iyo inuu ku rakibin qalabka dhar dhaqida, qalajiyayaasha, maacuun dhaqida, marwaxadaha, kuleyliyeyaasha, qaboojiyeyaasha, ama qalab kasta oo ku jira hoyga iyada oo uusan ka haysan oggolaansho qoraal ah oo hore Mulkiilaha;

(10) siiyo Mulkiilaha ogeysiis degdega ah oo ku saabsan qoyanka iyo qoy yar iyo/ama qalabka ku raaga gudaha ama agagaarka hoyga, oo ay ku jiraan waxkasta oo aan habooneyn biyo-fadhiisad ama qoyaan ah oo ku uruuro saqafka, sagxada, daaqadaha, derbiyada, aaladaha rakiban, aaladaha elegtarooniga ah ama qalabka;

(11) siiyo Mulkiilaha ogeysiis degdeg ah oo uruurka muuqaal ay sameeyaan gaska, caaryada ama baraa-buqa kale ee ku dhasha dusha sare ee hoyga;

(12) kormeero oo tijaabiyo qalabyada bixiya digniinta dabka ee hoyga bil kasta iyo qalabyada bixiya digniinta dabka toddobaad kasta. Kiraystaha waa inuu oggeysiiyaa Mulkiilaha si deg deg ah haddii wax qalabka bixiya digniinta dabka uusan si buuxda u shaqeynin. Waxay ku noqoneysaa xadgudub heshiis kiro oo dhanka Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta oo kale ee hoos yimaada Kiraystaha ee u horseedo ama u oggolaado inay noqdaan qalabka bixiya digniinta dabka inay noqdaan guud ahaan ama qayb ahaan kuwa aan shaqeyn ama aan xiriirsaneyn iyada oo laga saarayo bateriga, adeegga korantada, ama si kalaba.

11. **Waxyeellada:** Mar kasta oo waxyeello ay keento taxaddar la'aan, si xun u isticmaal, ama dayacaadda Kiraystaha, qoyskiisa ama qoyskeeda ama martidiisa/martideeda, wuxuu oggolaanayaa Kiraystaha inuu bixiyo:

a. kharashka ku baxa dayactirka oo dhan waana inuu sidaa sameeyaa 30 maalmood gudahood ka dib marka la helo dalabka mulkiilaha ee dalacaada dayactirka; iyo

b. kirada muddada uu hoygu waxyeellada qabay hoyga haddii degid ku habboonaa iyo haddii kalaba. Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay in HUD aysan bixin doonin lacago kaalmo ah muddo kasta oo uu hoygu yahay mid aan degid ku habboonayn. Muddo kasta oo caynkan ah, Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu bixiyo kirada suuqa ee HUD ansaxiyey halkii uu ka bixin lahaa ijaarka Kiraystaha lagu muujiyay farqada 3aad ee heshiiskan.

12. **Xannibaadyada wax-ka-beddelka:** Wax wax-ka-beddel ah, ku darid ah, ama hagaajin ah waa in aan lagu sameeyn gudaha ama dhismaha iyada oo aan oggolaansho qoraal hore ah laga haysan Mulkiilaha. Marka laga helo ogeysiis macquul ah Kiraystaha, Mulkiilaha wuxuu oggolaanayaa inuu siiyo dabaqaad macquul ah oo ku saabsan naafonimada kale ee Kiraystaha xaqa

u leh, oo ay ku jiraan beddelida sharciyada, siyaasadaha, ama habraacyada iyo samaynta iyo bixinta isbeddelada qaabdhismeedka hoyga ama goobaha gaarka ah. Mulkiilaha loogama baahna inuu bixiyo dabaqaad ka kooban wax-ka-beddelka aasaasiga ah ee Barnaamijka Mulkiilaha ama noqon kara dhibaato adag oo maaliyadeed iyo maamul. Eeg xeerarka ku yaala 24 CFR Qaybta 8. Intaas waxaa dheer, haddii isbeddel qaabdhismeed la codsaday uu keeno dhibaato weyn oo maaliyadeed iyo maamul, Mulkiilaha waa inuu markaa u oggolaado kiraystaha inuu sameeyo oo bixiyo lacagaha isbeddelada si waafaqsan Guryeynta loo Simanyahay.

13. **Xayiraaddaha Guud:** Kiraystaha waa inuu ku noolaado hoyga, waana inuu hoyga ahaado meesha keliya uu deggan yahay Kiraystaha. Kiraystaha wuxuu u isticmaali doonaa dhismaha kaliya hoy gaar ah ee isaga/iyada iyo shakhsiyaadka ku qoran liiska Xaqiijinta U-hoggaansamida Mulkiilaha ee Habraaca U-qalmashada Kiraystaha Kiraystaha iyo ijaarka ee HUD. Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu u fasaxo shakhsiyaadka kale inay ku noolaadaan hoyga ka dib kaliya marka la helo oggolaanshaha qoraal ee hore ee Mulkiilaha. Kiraystaha waxaa loo oggol yahay inay marti ku soo booqato hoygiisa. Si kastaba ha ahaatee, Mulkiilaha wuxuu xaq u leeyahay inuu helo cadeyn qoraal ah oo degganaansho ama caddaynta degenaanshaha ee martida Kiraystaha, haddii mulkiiuhu hayo sabab macquul ah oo la rumaysan karo in qofka martidu dhab ahaantii yahay degane qoyska oggolayn. Sababtaasi la rumaysan karo ayaa laga yaabaa inay timaado mar kasta oo qof qaan-gaar ah uu sameeynayo booqashooyin soo noqnoqda, ama hal booqasho oo joogta ah, oo 14 maalmood iyo/ama habeen ah 45 cisho gudahood iyada aan ogaysiis horay loo siinin Mulkiilaha. Haddii Kiraystaha ama qofka (dadka) laga hadlayo aaney bixinin macluumaadka la codsaday ee looga baahan yahay in lagu xaqiijiyo degenaanshaha kale, ama haddii kale ay xaqiiqadu ku filan tahay caddaynta degenaanshaha hoyga, markaa qofkaas (dadkaas) waa in loo aqoonsadaa inay yihiin deggane (degganayaal) aan sharci aheyn wuxuuna Kiraystaha ku jiraa xadgudub heshiis oo ku saabsan shuruudaha Heshiiska Kirada. Kiraystaha wuxuu ku oggolaanayaa in "Caawiyaha" ku noolaan karo hoyga kaliya ka dib marka; (1) Kiraystaha gudbiyay codsi hore oo qoraal ah oo arrintaasi ah, (2) Kiraystaha ka helay ogolaansho hore oo qoraal ah Mulkiilaha, iyo (3) "Heshiiska Dheeraadka ee Caawiyaha" si buuxda u fuliyeen Kiraystaha, "Caawiyaha" la ansaxiyay iyo wakiilka rasmiga ah ee Mulkiilaha. Kiraystaha wuxuu oggolaanyaa inuusan:

a. sii kireeynayn ama qoondaynayn hoyga, ama qeyb ka mid ah hoyga;

b. u adeegsnayn hoyga ujeeddooyin sharci darro ah;

c. ku lug yeelan ama fasaxin hawlaha sharci darrada ah in lagu qabto hoyga, goobaha guud ama dhismaha;

d. ku haysan rabaayad ama xayawaano nooc kasta ha ahaadaane iyada oo laga haysan oggolaansho qoraal ah oo hore Mulkiilaha, laakiin Kiraystaha marka uu bixiyo ogeysiis hore oo macquul ah, Mulkiilaha wuxuu u oggolaan doonaa inuu Kiraystaha ku haysto xayawaan looga baahan yahay dabaqaada macquulka ah ee naafonimada Kiraystaha, wuxuuna u oggolaanayaa xayawaano in ay wehliyaan martida ee naafada ah kuwaas oo u baahan xayawaanada noocan ah kuwa lagu dabaqi karo naafonimadooda; ama

e. sameyayn ama fasaxayn buuq ama ficilada ka hor imaanaya xuquuqda ama raaxada deriska. Kiraystaha wuxuu ogolaanayaa inuu ka dhigo dhawaaqa raadiyaha, qalabka codka, telefishanka ama qalabka muusiga heer, oo aan dhibin deriska.

14. **Xeerarka iyo Qawaaniinta:** Xeerarka iyo qawaaniinta soo socda waxay si macquul ula xiriiraan badqabka, daryeelka iyo nadaafada duddada iyo badqabka, raaxada, iyo u sahlanaanta dadka deggan. Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa, isaga oo ka wakiil ah Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha iyo dhammaan dadka kale ee hoos yimaada Kiraystaha, si ay ugu hoggaansamaan shuruudaha iyo qawaaniinta soo socda, iyo weliba iyaga oo si dheeraad ah u aqbalayo in ay u hoggaansamaan sharciyada iyo qawaaniinta kale ee macquulka ah ee Mulkiilaha laga yaabo inuu waqti ka waqti qaato, iyada oo Mulkiilaha siiyay 30 maalmood oo ogeysiis qoraal Kiraystaha ka hor hirgelinta. Kiraystaha wuxuu aqbalayaa mas'uuliyada buuxda ee ku xadgudubka (xadgudubyada) shuruucdan iyo qawaaniintan oo ay gaystaan mid kasta oo ka mid ah shakhsiyaadka kor ku xusan. Xeerarkan iyo qawaaniintan waa qeyb ka mid ah ijaarkan xadgudub kasta oo ay gaystaan mid kasta oo ka mid ah shakhsiyaadka kor ku xusan waxay ka dhigan tahay ku xadgudubka ijaarkan ee Kiraystaha wuxuuna siinayaa Mulkiilaha ikhtiyaaraad iyo xalalka ku xusan faqradda 23aad ee Heshiiska Ijaarkan. Mulkiilaha ma awoodo mana ka doonayo Kiraystaha in kireyste kale ama xubnaha qoyskooda ama martidooda ay u hoggaansamaan shuruucdan iyo qawaaniintan.

a. Ma jiraan wax alaab shakhsiyadeed ah nooc kastaba ha ahaatee oo lagaga tagi karo

ardaaga, hareeraha dhabada, baakinada, sagxadaha jaraanjarooyinka, daaradaha, balakoonada, golaha dadweynaha, ama goobaha guud ee kale.

b. Ma jiraan wax looriyo, isjiidyo, guri-gaadiidyada, doonyaha, gaadiidka madadaalada, ama gawaarida la midka ah oo la dhigi karo goobaha baakinka ama dhulka dhismaha. Mulkiilaha wuxuu xakamayn karaa waqtiga, habka iyo goobta lagu baakin gareeyo baabuurta rakaabka ee gaarka loo leeyahay, looriyada iyo mootooyinka. Mulkiilaha wuxuu xakamayn karaa waqtiga, habka iyo goobta lagu baakin gareeyo baabuurta rakaabka ee gaarka loo leeyahay, looriyada iyo mootooyinka. Gaadiidku wuxuu si sharci darro ah ugu baakin garaynsanyahay dhismaha duddada marka uu qaato wax ka badan hal baakin, oo uu leeyahay Kirayste wareejiyay ama ka tagay hoyga, ku baakin gareysan boos loo calaamadeeyay curyaamiinta isaga oo aan laheyn calaamada curyaamada ee sida sharciga loo doonayo, lagu baakin gareeyay dhabaha gaadiidka, dhabaha dabka ama goob lagu asteeyay "waa ka mamnuuc baakinka", lagu baakin gareeyo cawska, dhabaha socodka ama daarada, ama uu ka xannibo gawaarida qashinka isticmaalka haanta qashinqubka.

c. Ma jiraan wax gaadiid, mishiinno ama qalab hagaajin ama dayactir ah nooc kasta ay ahaadaanba oo loo oggolyahay in la dhigo duddada dhexdeeda. Ma jiraan wax baakin ama dhigid ah oo laga oggolyahay duddada dhexdeeda ee gaadiidka aan la diiwaangelin ama aan shaqaynayn. Mid kasyta oo gaadiidka aan shaqayneyn ama aan la diiwaangelin waxaa laga yaabaa inuu Mulkiilha ku qaado kharashka mulkiilaha uu ku diiwaangashan yahay haddii gadiidka la sheegay la qaadin afartan iyo siddeed (48) saacadood gudahood marka Mulkiilaha ku dhejiyo ogeysiis qoran gaadiidka la sheegayo ama marka uu bixinyo ogeysiis sida kale ku xusan ijaarkan.

d. Keenista ama u oggolaanshaha qeylo dheer ama buuq badan iyo/ama ku lug lahaanshaha wax kasta ee kale oo la diidi karo, khalkhal gelin karo, qas ah ama weerar ah duddada dhexdeeda ee Kirayste kasta, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qofkasta oo hoos yimaada Kiraystaha, lama oggola. Iyadoo la tixgelinayo deriskaaga, Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kale oo hoos yimaada Kiraystaha ma wareegi karaan ama ma isugu imaan karaan bannaanka hoyga ama meel kasta oo kale oo ka tirsan dhulka duddada ka dib 10:30 galabnimo. Intaa waxa dheer, dhammaan telefishannada, samaacadaha, raadiyeyaasha, qalabka muusikada iyo qalabyada kale ee maqalka ama qalabka dhawaaqa dhaliya ama qalabka elektarooniga waa in si gaar ah loo yareeyo dhawaaqooda ka dib 10:30 galabnimo, iyo dhammaan dhawaaqyada kale waa in la xaddidaa si aadan u dhibin deriskaaga.

e. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha, waa inaysan ku qubin qashin goobaha guud ee duddada. Haamaha qashinka waxaa bixinaya Mulkiilaha. Dhammaan qubka, qashinka, iyo nooc kasta oo qashin ah waa in lagu xiraa bacaha qashinka oo leh dabool, la saaro haamaha la bixiyay, waana in la saaraa daboolka.

f. Dhillaysi nooc kasta ah waa ka mamnuuc duddada dhexdeeda. Fadlan ogeysii maareeyaha haddii ay dhacdo. Ku iibinta garaashka ama wareejinta waa ka mamnuuc duddada dhexdeeda. iyada oo aan laga haysan oggolaansho qoran oo hore Mulkiilaha. Hoyga ama dhulka duddada midkoodna ma isticmaali karo Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha, si ay ugu qabsadaan wax hawl ganacsi ah.

g. Ma jiraan wax walxo ama qalab ah aan gaar ahaan loogu talagelin nadaafada bulaacada, oo ay ku jiraan, balse aanan ku ekayn, istaraashooyinka, cufka, xafaayada la tuuro ama reebreebka, waa inaan lagu ridin musqusha ama bullaacadaha. Kiraystaha waxaa lagu dallacayaa wakhtiga iyo qalabka la saaray haddii uu dib-u-beddel biyogelin ama dhibaatooyinka biyogelin keeno. Kiraystaha waxaa lagu soo dallaci karaa dhammaan waxyeellooyinka ka dhasha.

h. Ma jiraan wax astaamo, calaamado, xayaysiin ama qalab kale ama walxo kale oo la dhigi karo daaqadaha ama derbiyada (gudaha iyo dibbeda labaduba), si dibadda looga arko, marka laga reebo fasax qoraal ah oo hore oo laga helay Mulkiilaha.

i. Waa inaan waxba la dhigin xakabad kasta ama meel kasta oo sagxada jaraanjarada ama jaranjarada ah. Rugaha, maryaha, ama katiifadaha, iwm, waa inaan lagu hurgufin, dhaqin ama warin si ay u qalalaan golaha guud midkoodna ama darbiyada, sagxada jaraanjarada, balakoonka, daaqada, albaabka, jaraanjarada, duddada dhexdeeda.

j. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha waa inaysan ku lug yeelan ama fasixin hawlo sharcidaro ah iyo/ama fal dambiyeed hoyga dhexdiisa ama qayb ka mid ah dhismaha duddada. La soo bixida ama isticmaalka, ama u oggolaanshada mid kasta oo xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada inuu la soo baxo ama isticmaalo, hubka, qoryaha baalootada, ama hubka halista ah ee kale sida lagu qeexay shuruucda gobolka lama ogola.

k. Meeraysashada ama qaylada ama habdhaqanka qaylo midna lagama oggola gudaha ama agagaarka golayaasha, jaraanjarooyinka, sagxadaha jaraanjarooyinka, qolka dhar dhaqa, qolka bulshada, dhismaha, baakinka ama meelaha kale ee ka mid ah duddada. Ma jiraan wax sigaar cabbid ah oo loo oggolyahay goobaha guud uu ku asteeyay Mulkiilaha "waa ka mamnuuc sigaar cabbida". Ma jiri doonaan wax korid ah, ama ku jimicsi ah, ama hawlaha jirdhiska la xiriiro oo loo oggol yahay in lagu sameeyo jaranjarooyinka, sagxadaha jaraanjarooyinka, haamaha qashinka, dhismayaasha, dayactirka, aalaabta rakiban, deyrka iyo/ama dhirta duddada. Qofna looma ogola inuu fuulo saqafka dhismo kasta ee duddada dhexdeeda.

l. Wax Rinji, waraaqaha gidaarka, waraaqadaha qurxinta, koolooyin, armaajooyin, albaabada dhalada ah, ama walxo ama qalab kale oo isticmaala koolooyin lama marin karo, rakibi karo ama laguma lifaaqi karo meel kasta oo ka mid ah hoyga iyadoo aan horay looga helin oggolaansho qoraal ah Mulkiilaha. Mulkiilaha wuxuu rabaa inaad awood u yeelatid inaad u qurxiso duddadaada sida aad doonayso, balse fadlan la xiriir maareeyaha dhismaha si aad u ogaato nooca koolada lagu taliyay.

m. Wax anteenooyin, bir siineed, biraha daaqada, shiraacyada, fiilooyinka korontada, astaamo, dayr, qurxin, bandhigyo, qalabka ama alaabta rakiban laguma rakibi karo, xiri karo ama lagu dhejin karo qayb kasta oo ka mid ah hoyga, ama dhismo kasta, goobaha guud ama dhulka ku yaala duddada dhexdeeda iyadoo aan horay looga helin oggolaansho qoraal ah Mulkiilaha.

n. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha midna kuma lug yeelan karo hawlo ka dhigan lab iyo qas ama dhibaato ku ah deganayaasha kale, ama ma abuuri, sababi ama oggolaan karo gaf ah, xanaaq dhalin karo ama qaylo, ur, iftiin aan aan ammaan ahayn ama shuruudaha ka dhigan lab iyo qaska ama dhibaato ku ah deganayaasha kale.

o. Wax baaskiilo, mootooyin, mootooyinka yaryar, ama baabuurta ama qalabka la midka ah laguma baakimi karo dusmada, marinadda, daaradaha, dhabaha socodka, ama cawska. Wax baaskiilo, mootooyin, mootooyinka yaryar, ama baabuurta ama qalabka la midka ah lama keeni karo hoyga wakhti walba. Dhammaan gawaarida iyo qalabka noocan oo kale ah ayaa la dhigi doonaa baakinka ama goobaha kale ee u asteeyay maareeyaha dhismaha.

p. Wax firaash-biyood ah lama dhigi karo ama laguma isticmaali karo hoyga dhexdiisa iyadoo aan Mulkiilaha horay looga haysan ogolaansho qoraal ah.

q. Xadka xawaaraha duddada waa 10 M.P.H. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha uguma waddi karaan gaadiid duddada dhexdeeda si si taxaddar la'aan ah ama aan ammaan ahayn.

r. Wax cabitaano khamri ah laguma cabi karo mid kasta oo goobaha guud ee duddada.

s. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha waa inuusan ku lug yeelan ama uusan u fasaxin hawlo ammaan ahayn, halis ah ama khatar ah gudaha hoyga ama qayb kasta oo ka mid ah duddada, oo ay ku jiraan dhulka iyo goobaha guud. Wax qalab ama walxaha halista ah, khatarta ah, ama ololi kara laguma kaydin karo hoyga dhexdiisa. Kiraystaha waa inuu si adag u xakameeyaa dhammaan baddeecooyinka, alaabaha iyo walxaha la keeno hoyga kuwaas oo laga yaabo inay sababaan wasakheynta hawada gudaha si looga fogaado abuurista xaalad ammaan ahayn ama aan caafimaadqab ahayn. Wax qalabyo ama aalado ah, kuwaasoo dhaliya dab ama koronto (tus. tooshashka loogu talagalay quraaradaha, qalabka alxanka, iwm.) lagama oggola duddada.

t. Kiraystaha wuxuu isticmaali doonaa oo kaliya isticmaalka muraayadaha caddaanka ah ama xoqashada muuqaalka waddada haddii shaagada shakhsi ahaaneed lagu rakibo cutubka.

u. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha waa inay u isticmaalaan dhammaan qalabka elegtarooniga, alaabta rakiban iyo qalabka uu bixiyay Mulkiilaha si ammaan ah oo ujjeedooyinka loogu talagalay ah kaliya. Qalabka jikada waa in loo nadiifiyo si joogto ah. Kiraystaha waa inuu la xiriiraa maareeyaha dhismaha haddii Kiraystaha uusan hubin sida hababka nadiifinta.

v. Kiraystaha waa inuu xaddidaa uruurka qoyaanka ee gudaha hoyga iyada oo laga dhigayo qoyaanka guddaha hoyga mid hooseeya si looga fogaado uumiga aan loo baahneyn, iyada oo loo marayo isticmaalka Kiraystaha marwaxada marka loo baahdo, iyada oo la isticmaalaya marwaxada hawo-qaadashada musqusha marka la qubaysanayo, iyada oo la warwaxada iskaamiintada jikada marka wax la karinayo, iwm.

w. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha midna waa inuusan baabbi'in, wax-ka-beddelin, waxyeellayn ama saarin qayb ka mid ah hoyga, goobaha guud, dhulka dhismaha, ama dhisme kasta, qalabka rakiban, qalabka, muuqaalka dhismaha, gaadiidka ama hantida shaqsiyadeed ee kale iyo waxyaabaha kale.

x. Marka lagu karinayo jibiska, duub basaleed ama cuntooyinka kale hoyga dhexdiisa kuwaasoo makiinada shiilista ay tahay tahay qalabka lagu taliyay, Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha waa inuu kaliya isticmaalaa qalab dowladdu oggolaatay, heerkulkiisa la xakameyn karo gaar ahaan loogu talagalay shiilida oo leh dabool ammaan ah oo shaqeynaya.

y. Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha, martida Kiraystaha ama qof kasta ee kale oo hoos yimaada Kiraystaha midna waa inuusan ku lug yeelan hawlaha faragelin kara maamulka duddada ama si xun u saameynaya kartida maamuleyaasha, qandaraasleyda, wakiillada iyo shaqaalahooda si ay u gutaan waajibaadkooda loo xilsaaray.

15. **Dib-u-xaqiijinta sida Joogtada ah loo Qorsheeyey:** Sanad walba marka la gaaro maalinta _____ ee _____, Mulkiilaha wuxuu ka codsan doonaa Kiraystaha inuu ka warbixiyo dakhliga iyo tirada uu ka kooban yahay qoyska Kiraystaha iyo bixinta macluumaad kasta oo kale ee looga baahan yahay HUD si loo go'aamiyo ijaarka Kiraystaha iyo lacagta kaalmada, haddii ay jirto. Kiraystaha wuxuu ogolaanayaa inuu bixiyo bayaanno sax ah oo ku saabsan macluumaadkan iyo inuu sidaas sameeyo ilaa taariikhda lagu caddeeyay codsiga Mulkiilaha. Mulkiilaha wuxuu xaqiijin doonaa macluumaadka uu bixiyay Kiraystaha wuxuuna u isticmaali doonaa macluumaadka saxda ah si uu dib ugu xisaabiyo lacagta ijaarka ee Kiraystaha iyo lacagta kaalmada, haddii ay jirto.

a. haddii Kiraystaha uusan soo gudbin macluumaadka dib-u-xaqiijinta ee loo baahan yahay taariikhda ku cad codsiga Mulkiilaha, Mulkiilaha wuxuu soo rogi karaa ganaaxyada soo socda. Mulkiilaha wuxuu u hirgelin karaa ganaaxyadan kaliya si waafaqsan habraaca maamulka iyo muddada cayiman ee lagu caddeeyay qaanuunka HUD, buug-yaraha iyo tilmaamaha la xiriira maamulka barnaamijyada kabidda dhaqaale ee qoysaska dhawrka ah.

(1) Weydiiso Kiraystaha inuu bixiyo kirada sare, qiimaha kirada suuqa HUD oggolaatay ee hoyga.

(2) Hirgeli wixii kordhinta kirada ah ee ka timaadda socodsiinta dib-u-xaqiijinta iyadoon la bixin ogeysiis 30-maalmood ah sida kale looga baahan yahay farqada 4aad ee Heshiiskan.

b. Kiraystaha wuxuu codsan karaa inuu la kulmo Mulkiilaha si uu ugala hadlo wixii isbeddel ah ee ku yimaada kirada ama lacaga kaalmada ee ka dhalata socodsiinta dib-u-xaqiijinta. Haddii Kiraystaha codsado kulan caynkaas ah, Mulkiilaha wuxuu ogolaadaa inuu la kulmo Kiraystaha oo ka doodo sida ijaarka Kiraystaha iyo lacagta kaalmada, haddii ay jirto, loo xisaabiyay.

16. **Ka Warbixinta Isbeddelada u Dhaxeya Dib-u-xaqiijinta si Joogta ah loo**

Qorsheeyey:

a. haddii mid ka mid ah isbeddeladan dhacaan, Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu si deg deg ah ugu sheego Mulkiilaha.

(1) Xubin ka mid qoyska ka guuro hoyga.
(2) Xubin qaangaar ah oo ka tirsan qoyska oo lagu sheegey inuu yahay shaqo la'aan xaqiijinti dhawayd ama dib-u-xaqiijinta uu helo shaqo.
(3) Dakhliga qoysku wuxu isugeyn kordho $200.00 ama wax ka badan bishii.

b. Kiraystaha wuxuu soo sheegi karaa hoos u dhaca ku yimaada dakhliga ama isbeddel kasta oo ku yimaada arrimaha kale ee la tixgeliyo marka la xisaabinayo ijaarka Kiraystaha. Haddii uusan Mulkiilaha haysan xaqiijin in hoos u dhac ku yimid dakhliga ama isbeddelka ku yimid arrimaha kale ay socon doonto wax ka yar hal bil, Mulkiilaha wuxuu xaqiijin doonaa macluumaadka wuxuuna sameyn doonaa dhimista kirada ee ku habboon. Si kastaba ha noqotee, haddii dakhliga Kiraystaha uu qayb ahaan ama guud ahaan dib loo bixiyo laba bilood gudahood, Mulkiilaha wuxuu dib u dhigayaa geedisocodka xaqiijinta illaa dakhliga cusub la ogaado, laakiin hoos u dhaca kirada ayaa dib-u-dhac ku dhici doona, Mulkiilahana waxaa laga yaabaa inuusan ka saarin hoyga Kiraystaha iyadoo u sabab tahay bixin la'aanta lacagta kirada inta lagu jiro xilliga hoos u dhaca la soo sheegay iyo dhamaystirka geedisocodka xaqiijinta. Kiraystaha wuxuu haystaa soddon maalmood ka dib marka uu helo ogeysiis qoran oo ku saabsan kirada la filayo inuu ku bixiyo wakhtiga kor lagu sharaxay ama Mulkiilaha wuxuu guriga ayuu ka saari karaa bixin la'aanta kirada awgeed. (Dib loo eegay 3/22/89)

c. Haddii Kiraystaha aanu kala talin mulkiilaha isbeddeladan ku-meel-gaarka ah, Mulkiilaha wuxuu u kordhin karaa ijaarka Kiraystaha ee kirada suuqa ee HUD oggolaatay. Mulkiilaha sidaas wuxuu samayn karaa kaliya iyadoo la raacayo wakhtiga cayiman ee habraaca maamuleed ee ku xusan qaanuunka HUD, buug-yaraha iyo tilmaamaha ku yaala maareynta barnaamijyada kabidda dhqaale ee qoysaska dhawrka ah.

d. Kiraystaha wuxuu codsan karaa inuu la kulmo Mulkiilaha si ay uga wada xaajoodaan sida isbeddelka dakhliga ama waxyaaba kale ay saameyn ugu yeesheen kiradiisa/kiradeeda ama lacagta kaalmada, haddii ay jirto. Haddii Kiraystaha dalbado kulan caynkan ah, Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inuu la kulmo Kiraystaha wuxuuna u sharixi sida ijaarka Kiraystaha ama lacagta kaalmada, haddii ay jirto, loo xisaabiyey.

17. **Jarrida Kaalmada-dhaqaale:**

a. Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay in kaalmada lagu helay magaciisa/magaceeda laga yaabo in la jarayo haddii dhacdooyinka ku jira lambarka 1aad ama lambarka 2aad ay dhacaan. Jarrida kaalmada macnaheedu waa in Mulkiilaha siin doono kaalmada kirayste kale ijraarka Kiraystahana dib loo xisaabin doono. Intaa waxaa dheer, haddii kaalmada Kiraystaha la jarro shuruudda (1) ee hoose awgeed, Kiraystaha ayaa looga baahan yahay inuu bixiyo kirada suuqa ee HUD oggolaatay ee hoyga.

(1) Kiraystaha ma siinayo Mulkiilaha macluumaadka ama warbixinta looga baahan yahay ee farqada 15aad ama 16aad inta lagu jiro 10 cisho gudahood ka dib marka la helo ogeysiiska mulkiilaha ee ujeedadiisu tahay inuu la jarro kaalmada lacageed ee Kiraystaha.

(2) Lacagta looga baahanyahay Kiraystaha inuu u bixiyo kiro ahaan iyo biilka korontada ee hoos yimaada xeerarka iyo qaanuunka HUD wuxuu u dhigmaa Kirada Guud ee Qoyska oo lagu muujiyay lifaaqa 1aad.

b. Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inuu siiyo Kiraystaha ogeysiis qoran oo ku saabsan jarrista la soo jeediyay. Ogaysiisku wuxuu kula talin doonaa Kiraystaha in, muddada tobanka cisho ee ku xigta taariikhda ogeysiiska, isaga/iyada waxay codsan karaan inay la kulmaan mulkiilaha si ay ugala hadlaan jarista kaalmada ee la soo jeediyay. Haddii Kiraystaha codsado wadahadal ku saabsan jarrista la soo jeediyay, Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inuu la kulmo Kiraystaha.

c. Jarrista kaalmada ma saameyn doonto xuquuqaha kale ee Kiraystaha ee hoos yimaada Heshiiskan, marka lagu daro xaquuqda deganaanshaha hoyga. Kaalmada waxaa dhici karta in dib loo soo celiyo haddii Kiraystaha uu soo gudbiyo dakhliga ama

macluumaadka kale ee looga baahan yahay habraaca HUD, Mulkiilaha wuxuu go'aamin in Kiraystaha u uqalmo kaalmo, oo kaalmadu la heli karo.

18. **Waajibaadka Kiraystaha ee Dib-u-bixinta Lacagaha:** Haddii Kiraystaha soo gudbiyo macluumaad been ah oo ku saabsan codsiga, xaqiijinta ama codsiga wax-ka-beddelka ku-meel-gaarka ah ama aanu soo sheegin isbeddel ku yimaada dakhliga qoyska ama arrimaha kale sida ku cad farqada 16aad ee Heshiiskan, oo sidaas awgeed, lagu dallaco kiro ka yar lacagta looga baahan yahay ee qaababka kirada ee HUD, Kiraystaha wuxuu ogolaanayaa inuu u soo celiyo Mulkiilaha farqiga u dhexeeya kirada isaga/iyadu bixin lahaa iyo kirada isaga/iyada lagu soo dallacay. Kiraystaha loogama baahna inuu dib u siiyo mulkiilaha si uu u bixiyo dallacaada hoose ee ku timaada ku guuldaraysiga Mulkiilaha inuu raaco habraaca HUD ee xisaabinta kirada ama lacagta kaalmada.

19. **Cabbirka Hoyga:** Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay in HUD ay ka rabto Mulkiilaha inuu u qoondeeyo hoyga sida waafaqsan heerarka degitaanka Mulkiilaha ee qoran. Heerarkaas waxaa ka mid ah tixgelinta cabbirka hoyga, xiriirka xubnaha qoyska, da'da iyo jinsiga xubnaha qoyska iyo mudnaanta qoyska. Haddii Kiraystaha yahay ama xaq u leeyahay hoy cabbir kale leh, oo la helo hoyga cabbirkiisa loo baahan yahay, Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu:

a. guuro 30 maalmood gudahood, isagoo isticmaalaya kharashkiisa, ka dib marka Mulkiilaha ogeysiiyo isaga/iyada in hoyga cabbirkiisa loo baahan yahay laga heli karo dhismaha dhexdiisa; ama

b. ku nagaado isla hoyga iyo bixiyo kirada suuqa ee HUD ay oggolaatay.

20. **Gelitaanka Mulkiilaha:**

a. Mulkiilaha wuxuu oggolaanayaa inuu galayo hoyga kaliya inta lagu jiro saacadaha macquulka ah, si uu u siiyo ogeysiis hore oo macquul ah oo uu ku saabsan ujeeddadiisa/ujeeddadeeda gelista hoyga, iyo inuu galayo hoyga kaliya ka dib marka uu helo oggolaanshaha Kiraystaha ee sidaas inuu sameeyo, marka laga reebo xaaladaha deg dega ah ee ka dhigaya ogeysiisyadaas mid aan macquul ahayn ama marka laga reebo farqada (c) ee hoose.

b. Kiraystaha ayaa horey u oggolaanaya inuu soo gelitaanka hoyga ee soo socda:

(i) Kiraystaha wuxuu oggolaanayaa inuu u fasaxo Mulkiilaha, wakiilkiisa/wakiilkeeda ama dadka kale, marka uu idmo Mulkiilaha, inay u galaan hoyga ujeeddada ah in la sameeyo dayactir macquul ah, iyo kormeer joogto ah.

(ii) Ka dib marka Kiraystaha uu bixiyay ujeedada ogeysiiska ee guuritaanka, Kiraystaha wuxuu ogolaanayaa inuu u fasaxo Mulkiilaha inuu tuso hoyga kiraystayaasha mustaqbalka saacadaha macquulka ah.

c. Haddii Kiraystaha guuro ka hor dhammaadka Heshiiskan, Mulkiilaha wuxuu geli karaa hoyga si uu u qurxiyo, dib-u-habeyn ugu sameeyo, wax-uga-beddelo ama haddii kale u diyaariyo hoyga dib u deggid.

21. **Mamnuuca Takooridda:** Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inaanu takoorid samayn oo ku saleysan jinsiyad, midab, diin, caqiido, asal qarameed, jinsi, da'da, xaaladda qoyska, iyo naafonimada.

22. **Isbeddelka Heshiiska Kirada:** Mulkiilaha waxaa laga yaabaa, isagoo ka haysta oggolaansho hore HUD, inuu beddelo shuruudaha iyo xaaladahaHeshiiskan. Isbeddel kastaa wuxuu bilabanayaa marka uu dhammaado muddada bilowga ama muddo isdabajoog ah. Mulkiilaha waa inuu ogeysiiyaa Kiraystaha wixii isbeddel ah waana inuu u soo bandhigaa Kiraystaha Heshiis cusub ama wax-ka-beddella lagu sameeyay Heshiiska jira. Kiraystaha waa inuu helaa ogeysiiska ugu yaraan 60 maalmood ka hor taariikhda la bilaabayo isbeddelka la soo jeediyay. Kiraystaha wuxuu aqbali karaa shuruudaha iyo xaaladaha la beddelay isagoo saxiixaya heshiiska cusub ka dibna u soo celinaya Mulkiilaha. Kiraystaha wuxuu diidi karaa shuruudaha iyo xaaladaha la beddelay asagoo siinaya Mulkiilaha ogeysiis qoraal ah kasoo/taasoo ujeeddadiisa tahay joojinta kireysiga. Kiraystaha waa inuu bixiyaa ogeysiiska caynkan ah ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta taariikhda isbeddelka la soo jeediyay hirgelin. Haddii Kiraystaha uusan aqbalin heshiiska wax-ka-beddelka lagu sameeyay, Mulkiilaha wuxuu u baahan karaa Kiraystaha inuu ka guuro dhismaha, sida ku cad farqada

23. **Joojinta Kiraysashada:**

a. Si loo joojiyo Heshiiskan, Kiraystaha waa inuu siiyaa Mulkiilaha ogeysiis qoraal ah oo 30-maalmood ah ka hor inta uusan ka guurin hoyga.

b. Jiijin kasta ee Heshiiskan uu sameeyo Mulkiilaha waa in loo fuliyaa si waafaqsan qaanuunka HUD, Sharciga Gobolka iyo Deegaanka, iyo shuruudaha Heshiiskan.

c. Mulkiilaha wuxuu u joojin karaa Heshiiskan sababahan soo socda awgood;

(1) U hoggaansanaan la'aanta Kiraystaha shuruudaha Heshiiskan qoran; ama

(2) Ku guuldareysiga Kiraystaha in uu fuliyo waajibaadyada hoos yimaada wax kasta oo ah Xeerka Mulkiilaha iyo Kiraystaha Gobolka; ama

(3) fal dambiyeedyada la xiriira daroogada uu ku sameeyo gudaha ama meel u dhow dhismaha Kireyste kasta, Kiraystaha ama xubnaha ama martida qoyska Kiraystaha, iyo hawl kasta oo caynkan ah oo uu ku sameeyo gudaha dhulka dhismaha qof kasta oo kale oo hoos yimaada Kiraystaha; ama

(4) Go'aan uu gaaray Mulkiilaha oo ah in xubin ka mid ah qoyska si sharci darro ah u isticmaalayo daroogo;

(5) Go'aan uu gaaray Mulkiilaha oo ah isticmaalka sharci-darrada ah ee isxigxiga ee daroogada oo faragalin ku hayso caafimaadka, amniga, ama xuquuqda farxada nabadeed ee deganayaasha kale ee dhismaha;

(6) falal dembiyeed uu gaysto kirayste, xubin kasta oo qoyska Kiraystaha, martida ama qof kale oo hoos yimaada Kiraystaha.

a. oo khatar ku ah caafimaadka, amniga, ama xuquuqda farxada nabadeed ee deganayaasha kale ee dhismaha (oo ay ku jiraan shaqaalaha maamulka hantida ee degan dhismaha); ama
a. oo khatar ku ah caafimaadka, amniga, ama xuquuqda farxada nabadeed degaaankooda ee dadka degan agagaarka dhismaha;

(7) haddii Kiraystaha ka cararayo dembi ku oogid, ama xabsi ama hayn ka dib marka loo xukumo, dembi, ama isku day dembi, waa dembi weyn, kaas oo ah dambi culus oo hoos imaanaya shuruucda meesha uu qofku ka cararayo, ama haddii, ay dhacdo in ay tahay Gobolka New Jersey, waa dembi weyn, ama Kiraystaha oo jabinaya xaalad seeto-dheero ama cafis sharafeed la soo rogay sida uu dhigayo sharciga Federaalka ama Gobolka; ama

(8) Haddii Kiraystaha ku xadgubayo xaalad seeto-dheero ama cafis sharafeed oo hoos timaada sharciga Federaalka ama Gobolka;

(9) Go'aan uu gaaray Mulkiilaha oo ah ku xadgudubka xubin qoyska ka tirsan ama isticmaalka sharci-darrada ah ee isxigxiga ee daroogada oo faragalin ku hayso caafimaadka, amniga, ama xuquuqda farxada nabadeed ee deganayaasha kale ee dhismaha;

(10) haddii Mulkiilaha go'aansado in kiraystaha, xubin kasta oo ka tirsan qoyska kiraystaha, marti ama qof kale oo hoos yimaada kiraystaha ku hawlan yahay fal-dambiyeed, iyadoon loo eegayn in kiraystaha, xubin kasta oo ka tirsan qoyska kiraystaha, marti ama qof kale oo hoos yimaada kiraystaha loo xiray ama loo xukumay fal-dambiyeedka noocaas ah.

d. Mulkiilaha wuxuu u joojin karaa Heshiiskan sababo kale oo wanaagsan, oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xaddidnayn, diidmada kiraystaha inuu aqbalo wax-ka-beddelka heshiiskan. Joojinta loogu talagalay "sababababa kale oo wanaagsan" waxay bilaaban karaan laga bilaabo dhammaadka muddada hore ee isxigxigta.

Muddada jabinta heshiiska kirada waxaa ka mid ah: (1) hal ama in ka badan oo xadgudubyo waaweyn oo la xiriira kirada; (2) xadgudubyada yaryar ee soo noqnoqda ee kirada kuwaas oo: (a) carqaladeeya ku noolaashaha dhismaha, (b) si xun u saameeya caafimaadka ama amniga qof kasta ama xuquuqda kireyste kasta u leeyahay inuu si deggan ugu raaxaysta dhismaha la ijaaray iyo fas'iilaadka la xiriira ee dhismaha, (c) faragaliya maareynta dhismaha, ama(d) saameyn xun ku leh dhismaha; (3) ku guuldareysiga kiraystaha inuu wakhtiga loogu talagalay bixiyo dhammaan macluumaadka loo baahan yahay ee dakhliga iyo arrimaha u-qalmitaanka, kiraystaha hoyga (oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, ku guuldareysiga inuu buuxiyo shuruudaha soo-bandhigida iyo xaqiijinta Lambarada Ammaanka Bulshada, ama ku guuldareysiga saxiixa iyo soo gudbinta foomamka oggolaanshaha si looga helo

macluumaadka mushaarka iyo qaansheegashada Wakaaladaha Xog Ururinta Mushaharka ee Gobolka); iyo (4) bixin la'aanta kirada ama waajibaadyada kale ee maaliyadeed ee la filayo oo hoos yimaada ijaarka muddada laguu qabtay ee sharciga Gobolka oggolyahay. Bixinta kirada ama waajibaadyada kale maaliyadeed ee la filayo oo hoos yimaada ijaarka ka dib taariikhda la filayo balse muddada la qabtay dhexdeeda sida sharciga Gobolka oggolyahay ayaa ka dhigan xadgudub yar.

e. Haddii Mulkiilaha soo-jeediyo inuu joojiyo Heshiiskan, Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inuu siiyo Kiraystaha ogeysiis qoran oo ku saabsan jarrista la soo jeediyay. Haddii Mulkiilaha u joojinayo Heshiiskan "sabab kale oo wanaagsan," ogeysiiska joojinta waa in boostada loogu diraa Kiraystaha ama loo geeyaa hoyga sida ay doonayaan HUD, ugu yaraan 30 maalmood ka hor taariikhda Kiraystaha laga rabo inuu ka guuro hoyga. Ogeysiisyada joojinta la soo jeediyay ee loogu talagalay sababo kale waa in la bixiyaa iyada oo la raacayo wakhtiyada cayiman kasta oo ku qoran sharciga Gobolka iyo deegaanka. Muddada ogeysiis kasta ay rabaan HUD waxay is garab socon karaan muddada ogeysiis kasta uu doonayo sharciga Gobolka iyo deegaanka. Dhammaan ogeysiisyada joojinta waa inay:

(1) cayimaan taariikhda Heshiiskan la joojin doono;

(2) sheegaan sababaha loo joojinayo oo leh faahfaahino ku filan oo loogu talagalay Kiraystaha si uu isugu diyaariyo daafacaad;

(3) kula taliyaan Kiraystaha in uu/ay haysto 10 maalmood kaas oo lagala wada hadli doono Mulkiilaha joojinta kirada la soo jeediyay. Muddada 10ka maalmood ah waxay bilaabaneysaa bilawga taariikhda ogeysiiska la geeyay hoyga ama ka dib maalinta taariikhda ogeysiiska la soo diray. Haddii Kiraystaha codsado kulan, Mulkiilaha wuxuu oggolaanayaa inuu kala hadlo Kiraystaha joojinta la soo jeediyay; iyo

(4) la socod siiyaan Kiraystaha ama xaquudiisa/xuquuqdeeda daafacaad ee tallaabadan gudaha maxkamada.

f. Haddii guri-ka-saarid la bilaabo, Mulkiilaha wuxuu oggolaanayaa inuu ku tiirsanaado keliya sababaha lagu sheegay ogaysiiska joojinta ee looga baahan yahay sida ku cad farqada (e).

24. **Khataraha:** Kiraystaha waa inuusan samayn, ama u oggolaan qoyskiisa/qoyskeeda ama martida inay sameeyaan, fal kasta oo halis ah ama sameeyaan wax kasta oo kordhin doona lacagaha caymiska dhismaha. Ficilka caynkaas ah wuxuu ka dhigan yahay jabin heshiis. Haddii hoyga uu waxyeelleeyo dab, dabayl ama roob ilaa xad uu hoyga ka noqdo mid aan lagu noolaan karin ayna waxyeelladu uusan sababin ama sameynin Kiraystaha, Kiraystaha wuxuu masuul ka noqon doonaa kirada kaliya ilaa taariikhda burburinta . Kiro dheeraad ah si joogto looma heli doono illaa iyo inta hoyga looga dayactirayo xaalad lagu noolaan karo.

25. **Ciqaabaha soo Gudbinta Macluumaad Been ah:** Siinta mulkiilaha adigoo og macluumaad been ah oo ku saabsan dakhliga ama waxyaabaha kale oo la tixgeliyo marka la go'aaminayo u-qalmashadab Kiraystaha iyo kirada waa jabinta heshiiska ijaarka oo ku xiran joojinta ijaarka. Intaas waxaa sii dheer, Kiraystaha mid ay ku waajibto ciqaabaha laga heli karo sharciga Federaalka. Ciqaabahan waxaa ka mid ah ganaaxyo gaaraya $10,000.00 iyo xabsi ilaa shan sano.

26. **Ka Maqnaanshaha Kiraystaha Hoyga:** Kiraystaha waa inuu ogeysiiyaa Mulkiilaha, qoraal ahaan, ka hor maalinta ugu horeysa ee Kiraystaha maqan yahay marka ay timaado in Kiraystaha ka maqnaado hoyga afar iyo toban (14) maalmood ama ka badan. Haddii Kiraystaha uusan bixin ogeysiis qoraal ah oo uu Kiraystaha uusan ku noolayn hoyga afar iyo toban (14) maalmood ama ka badan, waxaa loo fahamayaa in Kiraystaha ka tagay qaybta hoyga.

27. **Ka Taggida Hantida Gaarka ah:** Kiraystaha waxaa loo aqoonsanayaa in uu ka tagay hanti shakhsiyeed markii Kiraystaha soo wareejiyo mulkiiliyada hoyga, khtiyaari ahaan ama sharci ahaan, oo uu ku guuldareysto inuu hantida caynkaas ah ka qaado guriga. Xaaladdan oo kale, Mulkiilaha wuxuu xaq u leeyahay inuu galo oo la wareego hoyga, oo ka saaro, keydiyo ama tuuro hantida shakhsiyeed kasta oo laga tagay hoyga go'aanka Mulkiilaha keliya. Qaybtan sinaba uma wareejinayso xuquuqda Mulkiilaha ee helitaanka kirada wakhti kasta marka Kiraystaha hantidiisa taalo hoyga.

28. **Ogeysiisyada iyo Codsiyada Dayactirka:** Dhammaan ogeysiisyada iyo codsiyada

hoosyimaada halkan waa inay ahaadaan qoraal si ay wax ku ool u noqdaann. Tani waxaa gaar ahaan ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, dhammaan ogeysiisyada xaaladaha ammaanka ahayn, halista ah iyo/ama khatarta ah, duruufaha iyo/ama xaaladaha gudaha ama agagaarka duddada iyo dhammaan codsiyada loogu talagalay degaanka macquulka ah. Mulkiilaha wuxuu ku haystaa foomam xafiiska kirada oo loogu talagalay ujeedooyinkaas. Mulkiilaha wuxuu sidoo kale oggolaanayaa inuu bixiyo kaalmo kasta oo uu Kiraystaha u baahdo si uu u buuxiyo shuruudan. Mulkiilaha waa in loo aqoonsadaa inuu haysto ogaysiis, sida ereygaas loogu isticmaalay halkan, marka laga dhigo qoraal oo uu shaqsi ahaan u helo maareeyaha dhismaha ee Mulkiilaha saacadaha shaqada ee caadiga ah. Cinwaanada ay tahay inay adeegsadaan dhinacyada si uu u siiyo ogeysiis midba midka kale:

Mulkiilaha: _____
_____
_____

Kiraystaha: _____
_____
_____

a. Dhammaan codsiyada dayactirka ama hagaajinta iyo dhammaan ogeysiisyada xaaladaha cillada/ammaan darrada ah ama shaqayn la'aanta waa in la qoraa oo loogu diraa maareeyaha dhismaha cinwaanka kor ku xusan ee Mulkiilaha. Mulkiilaha wuxuu ku haystaa foom xafiiska kirada oo loogu talagalay ujeeddadan. Haddii ay dhacdo xaalad deg-deg ah oo qoraalka ka dhigaysa mid aan suurtogal ahayn, Kiraystaha waa inuu dabagal ku sameyaa dhicida xaaladda deg-dega ah isagoo samaynayo ogeysiis qoraal ah oo ma aha kaliya tilmaamaya xaaladda degdegga ah, balse sidoo kale jawaab-celin ugu horreysa ee ay bixiyaan wakiilada Mulkiilaha iyo tallaabooyin kasta oo dheeraad ah ee Kiraystaha aaminsan yahay in loo baahan yahay in la qabto. Mulkiilaha wuxuu sidoo kale oggolaanayaa inuu bixiyo kaalmo kasta oo uu Kiraystaha u baahdo ee arrintan la xiriira. Qoraal kasta oo uu Mulkiilaha ama wakiilkiisulaga yaabo inay diyaariyaan oo ku habboon mid kasta oo codsiyada iyo ogeysiisyada laga helo Kiraystaha, ma buuxin karaan waajibaadka Kiraystaha in uu meelmariyo codsigiisa/codsigeeda hagaajinta iyo ogeysiisyada xaaladaha cillada/ammaan darrada ah ama shaqayn la'aanta qoraal ahaan. Haddii Mulkiilaha si ikhtiyaari ah ugu hoggaansamo, ama ka jawaabo, codsi afka ah ama ogeysiis ka yimid Kiraystaha, u hoggaansamida ikhtiyaarka ah ama jawaabcelinta kama qaadayso Kiraystaha mas'uuliyadiisa/mas'uuliyadeeda ah ka dhigida codsiyada iyo ogaysiisyada qoraal ahaan.

29. **Luminta Curaarta iyo Hantida Gaarka ah:** Waa waajibka kaliya ee saaran Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha iyo martida Kiraystaha inay la tacaalaan amnigooda iyo nabadgelyadooda, gaar ahaan marka ay isticmaalayaan iyo/ama ay isku halaynayaan qufulada albaabada, qataarada daaqadaha, qalabka sheega dabka iyo dhammaan aaladaha kale amniga iyo nabadgelyada ee gudaha iyo agagaarka hoyga. Kiraystaha wuxuu fahamsan yahay mid kasta oo tallaabooyinka ama qalabka amniga uu bixiyo Mulkiilaha inaysan ka dhignayn kafaala-qaad deg-deg ah ama maldahan oo amniga shakhsiyeed ama kafaalo-qaad ama damaanadqaad ka dhan ah fal-dambiyeedka ama yaraynta halista fal-dambiyeedka. Haddii aanan si kale u dhigin sharciga, Mulkiilaha mas'uuliyad kama saarno Kiraystaha ama xubnaha qoyska Kiraystaha ama martida wixii dhaawacyo, waxyeelo ama khasaaro ku yimaada qof kasta ama hantida oo ka dhasha fal-dambiyeed iyo/ama dhaqan sharci-darro ah ay sameeyeen dad kale, oo ay ku jiraan xatooyo, tuuganimo, weerar, kharribaad, iyo/ama wax kasta oo fal-dambiyeed ah iyo/ama hawlo sharci darro ah. Mulkiilaha kuma qasabano inuu bixiyo waardiye, nalalka amniga, dayrarka amniga iyo/ama albaabyo, ama nooc kasta oo amniga ah, laakiin Mulkiilaha wuxuu u hoggaansamayaa dhammaan sharciyada khuseeya. Mulkiilaha wax mas'uuliyad kama saarno xirmooyinka looga tago bannaanka albaabyada ama meel kale oo ka mid ah duddada.

a. Mulkiilaha mas'uuliyad kama yahay Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha ama martida Kiraystaha martida wixii dhaawac shakhsi ahaaneed, ama waxyeelo kasta, ama khasaaro kasta oo, hantida shakhsi ahaaneed gaarto, oo ka dhalata dabka, qiiqa, roobka, fatahaada, darrorka, roob dhagaxyaalaha, barafka, ceeryaamada, iftiinka, dabaysha, qaraxa, goynta korontada, shaqayn la'aanta qalabka elegtarooniga ama qalabka HVAC, korontada, khasabadgelinta iyo/qalabyada iyo nidaamyada kale, xatooyada ama kharribaadda, haddii uusan dhaawacaas ama waxyeelladaas ka dhalan dayacaada ama guuldareysiga Mulkiilaha inuu fuliyo waajibaad uu Mulkiilhuhu ku soo rogay sharciga. Waa mas'uuliyada Kiraystaha, xubnaha qoyska Kiraystaha iyo martida Kiraystaha inay ku dadaalaan inay ilaaliyaan ammaankooda iyo inay hantidooda hantaan haddii ay dhacaan mid ka mid ah dhacdooyinka ama xaaladaha kor ku xusan.

b. Waxaa lagula talinayaa Kiraystaha inuu helo caymiskiisa/caymiskeeda gaarka ah si uu uga ilaaliyo hantidiisa/hantideeda dabka, xatooyada iyo khasaaraha kale (Caymiska Kiraystaha). Mulkiilaha wuxuu caymis u haystaa kaliya dhismihiisa, ee ma aha hantida shakhsiyadeed ee Kiraystaha.

30. **Ka-dhaafid Mulkiiliyad:** Ka-dhaafid kasta uu sameeyo mulkiilaha ee jebinta shuruud kasta, xaalad iyo/ama axdiga Heshiiska waa inuu ahaadaa mid qoraal ah waana inuu saxiixaa maareeyaha dhismaha ee gobolka ee Shirkadda Maareynta Hantida ee Franklin si ay u noqoto mid taabogal ah, iyo wixii ka-dhaafitaan noocaas ah, xitaa marka hantida loo oggolaado, looma arki karo inay ka saamaxayso wixii jebin ceynkaas oo kale ah ama shuruud kasta oo kale, xaalad ama axdiga Heshiiska. Guuldarro kasta oo ka timaada dhanka Mulkiilaha inuu ku adkeysto fulinta adag ee shuruudaha, xaaladaha iyo axdiyada ku jira Heshiiskan oo qaybta Kiraystaha ah, ma noqon doonto, loomana fasiran doono, ka-dhaafitaan ama ka-tagis xuquuqda Mulkiilaha oo markaasi ka dib lagu dabaqayo meelmariyo shuruuda caynkan ah, xaalada ama axdiga Heshiiskan mustaqbalka, kaas oou sii socon ndoona si buuxda oo saameyn leh. Wax caaddo ama dhaqan ah oo laga yaabo in uu la dhex dhashay Mulkiilaha iyo Kiraystaha ee maamulidda shuruudaha Heshiiskaan looma tixgelin doono ka-dhaafid, ama si kasta ma saameyn dooto xuquuqda Mulkiilaha ee ku adkaysto fulinta Kiraystaha iyadoo si adag loo raacayo shuruudaha la sheegay.

31. **Dulucda Heshiiskan:** Heshiiskan iyo lifaaqyadiisa waxay ka dhigan yihiin heshiiska guud ee u dhaxeeya Kiraystaha iyo Mulkiilaha ee hoyga. Haddii ay Maxkamad ku dhawaaqdo in qoddobo gaar ah oo ku jira Heshiiskan inay yihiin kuwo aan sharci ahayn ama sharci daro ah, dhammaan shuruudaha kale ee Heshiiskani waxay ahaanayaa kuwo hirgeli doona Mulkiilaha iyo Kiraystaha labaduba way sii wadi doonaan inay ku qasbanaadaan.

32. **Lifaaqyada Heshiiska:** Kiraystaha wuxuu caddeeynayaa in isagu/iyadu heleen nuqulka Heshiiskan iyo lifaaqyada soo socda ee Heshiiskan oo ay fahamsan yihiin in lifaaqyadan ay qayb ka yihiin Heshiiskan.

a. Lam. Lifaaqa 1 - Xaqiijinta U-hoggaansamida Mulkiilaha ee Habraaca U-qalmashada Kiraystaha Kiraystaha iyo ijaarka ee HUD, foomka HUD-50059

b. Lam. Lifaaqa 2 - Warbixinta Kormeerka Hoyga.

33. **Xuquuqda Abaabulka ee Kiraystaha:** Mulkiilaha wuxuu ogolaanayaa inuu u oggolaado kiraystaha iyo qabanqaabiyeyaasha kiraystaha in ay ku qabtaan dhismaha hawlaha la xiriira aasaasida ama hawlgelinta urur kirayste oo la sameeyay sida waafaqsan shuruudaha HUD.

34. **Xaqiijinta Dakhliga Kiraystaha:** Kiraystaha waa inuu si deg deg ah u siiyaa Mulkiilaha warqad kasta ama ogaysiis kasta oo kale oo HUD ah xubinta qoyska ka tirsan oo bixisa macluumaad ku saabsan caddadka ama xaqiijinta dakhliga qoyska sida waafaqsan shuruudaha HUD.

35. **Joojinta Qaybta 8aad ee Heshiiska Taageerada Guryeynta:** Marka laga reebo qodobbada kale ee halkan halkan, heshiiskan ijaarka ayaa si toos ah u joojin doona haddii Qaybta 8aad ee Heshiiska Kaalmada Guriyeynta joogsato sabab kasta ha ahaatee.

36. **Saxiixyada:**

_____ ____/____/____
Kiraystaha TAARIIKHDA LA SAXIIXAY

_____ ____/____/____
Kiraystaha TAARIIKHDA LA SAXIIXAY

MULKIILAHA

SAMEEYAY: _____ ____/____/____
Wakiilka Rasmiga TAARIIKHDA LA SAXIIXAY